Xiliga dabka kaymuhu kaco: Dhowr badqabkaaga. Diyaar garoow.

Iyada oo cimilada Oregon ay sii kululaaneyso oo ayna sii qallaleyso, dababka kaymaha ayaa si lama filaan ah u dhici kara oona si degdeg ah u fidi kara, taas oo kordhinaysa suurtagalnimada Daminta Korontada Badbaadada Dadweynaha. Waanu is diyaarinaynaa waxaanan kugula talineynaa inaad sidaas oo kale samayso.

Waa maxay Daminta Korontada Badbaadada Dadweynaha?

Haddii xaaladaha cimilada daran ay khatar gashaan awoodeena ku shaqaynta si amaan ah qalabka korontada, waxaan u baahan karnaa inaan daminno korontada meelaha khatartoodu badan tahay si loo dhawro badqabka dadwaynaha. Tallaabadan kama dambaysta ah ee cabbirka badbaadada waxaa loo yaqaanaa Daminta Korontada Badbaadada Dadweynaha, ama PSPS.

Waxaan tixgelinaa arrimo badan marka aan go'aansaneyno in PSPS ay lagama maarmaan tahay iyo in kale, oo ay ku jiraan:

- **Dabaylo badan**
- **Heerkulka**
- **Heerarka Ka Hortagga Dabka/Digniinta Calanka Cas**
- **Qoyaanka dhirta/ dhirta qallalan**
- **Heerarka qoyaanka hooseeya**
- **La shaqeynta hay'adaha maxalliga ah iyo kuwa gobolka**
- **Khatarta dabka ee ku aadan qalabka korontada**
- **Kormeerada waqtiga-dhabta ah ee ka dhanka ah goobta**

Sababtoo ah Daminta Korontada Badbaadada Dadweynaha waxay socon kartaa dhowr saacadood ama maalmo badan, waxaa muhiim ah inaan dhammaanteen diyaar u nahay oo aad leedahay qorsha degdeg ah oo kuu meeleyan.

Waa kuwan waxa aad filan karto

Haddii aan u baahanahay in aan shidno PSPS, waxaanu ka shaqaynaa in aanu yareyno tirada dadka ay saamaysay iyo dhererka muddada ay koronto la'aanta yihiin.

MAR WALBA LA IDIN OGEYSIIN DOONA
Ka hor, inta lagu jiro iyo ka dib PSPS, waxaan ku siin doonaa macluumaad iyo aqbaaraad ku saabsan waxa siyaabo badan u dhacaya. Hubi inaad nala cusboonaysiiso macluumaadkaaga xiriirka si aan si joogta ah ugu wada xiriirno.

TAAGEERIDA BULSHADEENA
Inta lagu guda jiro PSPS, Xarumaheena Agabka Bulshada waxay bixin doonaan macluumaad, biyo, danabeynta loogu talagalay qalabyada elektarooniga ah iyo gelitaanka Wi-Fi.

DIB UGU SOO CELINTA KORONTADAADA SI BADQAB AH
Marka ay badbaado tahay in sidaa la sameeyo, shaqaalaheena waxay si muuqaal ah u baaraan khadadkeena iyo qalabkeena mayl-ilaa-mayl si loo helo dhaawaca oo ayna u sameeyaan dayactirada lagama maarmaanka ah, iyaga oo u shaqeynaya sida ugu dhakhsaha badan ee badbaadadu u ogolaato dib u soo celinta korontada.

Waxaad faahfaahino dheeraad ah ka heli kartaa **portlandgeneral.com/wildfireoutages** (Ingiriis ku qoran).

Sida aan ugu diyaargarowno dabka kaymaha sanadka oo dhan

Waxaan qaadnaa taxadaro dheeraad ah si aan u ilaalino dadka, hantida iyo deegaanka dabiiciga ah. Sannad kasta, waxaanu eegnaa aagaggeena PSPS waxaanu qiimaynaa baahida loo qabo nadiifinta hormarsan ee geedka iyo maareynta hagaajinta. Waxaan wax ka badelnaa ama ku badelnaa qalabka halka loo baahdo si loo kordhiyo iska caabbinta dabka oo loo yareeyo khatarta gubasho.

La socoto wararka

Booqo **portlandgeneral.com/wildfireoutages** (Ingiriis ku qoran) si aad u hesho xogtii ugu danbeysay ama naga soo wac **503-228-6322**. La Taliyaasheena Adeegga Macaamiisha waxay kugu caawin karaan in ka badan 200 oo luuqadood.

Tillaabooyinka ay tahay inaad qaado si aad u diyaargarowdo

Halkaan waa biloow oo kaliya. **Booqo portlandgeneral.com/beprepared** (Ingiriis ku qoran) ama naga soo wac **503-228-6322** si aad u hesho siyaabo dheeraad ah oo aad u diyaargarowdid.

HEL XOGTII UGU DANBAYSAY
Nala cusbooneysii ciwaanka iimaylkaaga iyo lambarka taleefankaaga onlayn, gudaha app-ka Korontada Guud ee Portland (Portland General Electric, PGE) ama adiga oo na soo wacaayo si aan u wada xiriirno.*

SAMEE XIRMADA KORONTA MAQNAANSHAHA XAGAAGA
Uruuri waxaad u baahan doonta si aad u ilaaliso badqabka qof walba haddii korontada ay go'do.

QORSHA SAMEE
Ka fakar sida aad u daryeeli doonto xubin qoyska ka mid ah oo qaba xaalad caafimaad ama aad biyo u heli doonto haddii aad haysato bamka ceelka, iyo/ama sida aad u maarayn doonto maqnaanshaha korontada barta ganacsigaaga.

** Qoraalka digniinaha ee maqnaanshaha korontada (Ingiriisi ku qoran) ayaa hadda diyaar u ah macaamiisha deegaanka iyo macaamiisha ganacsiyada yaryar ee leh wax ka yar lix koontooyin.*

Barnaamijka shahaadada caafimaadka

Haddii adiga ama qof qoyskaaga ka mid ah uu qabo xaalad caafimaad oo u baahan koronto, xaqiiji inaad haysatid ilo koronto oo kayd ah iyo qorshe degdeg ah. Tixgeli inaad iska diiwaangeliso barnaamijkeena shahaadada caafimaadka kaas oo aad wax badan ka baran karto barta **portlandgeneral.com/medical** (Ingiriis ku qoran), ama naga soo wac **503-228-6322**.

Waa xiligii dabku kici jiray. Diyaar garoow.

Cimilada Oregon ayaa sii noqonaysa mid kulul oo qalalan, taasoo ka dhigan in dabka duurku uu dhawaan kici karo uuna degdeg u faafi karo. Haddii xaaladaha daran ee cimiladu ay khatar gashaan in agabkeenu sii daarnaadaan, waxaan u baahan karnaa inaan damino korontada oo noqon karta talaabada ugu danbaysa ee badqabka.

Koronto goyntaan, ayaa sidoo kale loo yaqaanaa **Public Safety Power Shutoff (PSPS, Koronto Daminta Badqabka Dadwaynaha)**, ayaa socon kara dhawr saacadood ama maalmo dhawr ah, marka waa muhiim inaad diyaar garoowdo.

Waxaad heli kartaa khariirada aagaga khatarta wayn ugu jira in dab ka dilaaco **portlandgeneral.com/wildfireoutages**.*

Sidaan ayaad u diyaar garoobi kartaa:

1 **Hel xogtii ugu danbaysay** adoo cusboonaysiinaaya iimeelkaaga koontada PGE si aan kuugusoo dirno ogaysiisyada la xariira marka korontada loo jaro amaan awgiis.

2 **Adeegso kiishada koronto jarista xagaaga** oo xaqiiji in qof kasta oo gurigaaga jooga uu yaqaano meesha ay ka helayaan.

Agabka aasaasiga ah qaarkood waxaa kamid ah:

- Lambarrada taleefanka xaalada degdega ah, ayna ku jiraan Adeegga Macaamiisha PGE: 503-228-6322 **La taliyaasheena adeegga macaamiishu waxay kugu caawin karaan 200+ oo luuqadood.**
- Nalalka falaashka ama madaxyada nalka
- Raadiye bayteri leh ama raadiyaha gacanta iyo saacad
- Marwaaxadaha ku shaqeeya beyteriga ama kuwa gacanta lagu qabto
- Beyteriyada dheeraadka ah
- Jaajarada gaariga oo aad ku jaaj garaynayso taleefannada, laabtoobyada iyo/ama kumbuyuutarada
- Biyaha dhalada ah ee dadka iyo xoolaha (haddii aad ku tiirsan tahay korontada si aad biyaha u bam garayso)
- Xirmooyinka barafka qaboow ama biyaha barafka ah ee ku jira bacaha ama dhallooyinka caaga ah (ku diyaarso talaagadaada)

3 **Samee Qorshe** si aad u sugto badqaba qoyskaaga iyo gurigaaga inta lagu jiro koronto go'a.

- Xili hore qorshayso inaad u guurto saaxiibadaa, ehelkaaga ama hooy, gaar ahaana haddii aad qabto xaalad caafimaad oo u baahan koronto ama haddii aad u baahan tahay inaad shaqayso ama wax ku barato guriga inta korontadu maqan tahay.
- Qorsayso baahiyaha caafimaadka si aad wali koronto ugu hesho qalabka inta lagu jiro koron go'a aadna ka fakarto inaad iska diiwaan geliso Medical Certificate program (Barnaamijkeena Shahaadada Caafimaadka). Tani waxay naga caawinaysaa inaan xili hore kulasoo xariirno si aan kuugu sheegno in korontada la daminaayo. Booqo **portlandgeneral.com/medical*** ama wac 503-612-3838 si aad xog badan uga hesho barnaamijka.
- Iskuday inaad iibsato matoor kayd ah aadna raacdo tilmaamaha shirkada samaysay si aad qaab amaan ah ugu isticmaasho.
- Qorshayso quudinta iyo biyo siinta xayawaannada rabaayada ah ama xoolaha haddii aad ku tiirsan tahay bamka korontada ku shaqeeya ee biyaha.
- Ka hel xog dheeraad ah webseedka degmadaada ama **National Fire Protection Association (Ururka Qaran ee Kahortaga Dabka)**, iyo **Red Cross (Laan-qayrta cas)** iyo **Ready.gov**.*

Si aad u hesho tilmaamo ku aad ugu diyaar garoobayso **portlandgeneral.com/prepare**.*

* Ingiriis